

Baahida Degdegga ah ee Macallimiinta Dugsiyada Sare ee Puntland: Caqabadaha iyo Talooyinka lagu Xalin Karo

HORDHAC

Waxbarashadu waa tiirka ugu weyn ee horumarka bulshada, waana furaha koboca dhaqaalaha, siyaasadda, iyo nabadda. Si kastaba ha ahaatee, nidaam kasta oo waxbarasho ma noqon karo mid tayo leh haddii uusan haysan macallimiin ku filan oo aqoon iyo karti leh. Puntland, oo ah mid ka mid ah maamul-goboleedyada ugu waaweyn Soomaaliya, ayaa wajahaysa caqabado culus oo la xiriira tirada iyo tayada macallimiinta dugsiyada sare, gaar ahaan marka la eego kororka weyn ee ardayda cusub ee kusoo biiraya heerka sare sanad dugsiyeedka soo socda.

Tirada Ardayda iyo Baahida Fasallada

Sannad dugsiyeedka 2025/2026 waxaa la saadaalinayaa in ugu yaraan 14,000 arday oo dhammaystay fasalka 8aad ay u gudbi doonaan fasalka 1aad ee dugsiyada sare. Haddii ardaydan loo qaybiyo fasallo ay ku jiraan celcelis ahaan 59 arday fasalkii, waxaa loo baahan doonaa in la furo ku dhowaad 237 fasal cusub. Taas micnaheedu waa in loo baahan yahay ugu yaraan 237 macallin — hal mid fasal kasta — si ardaydaas loogu helo waxbaris joogto ah.

Tirada Macallimiinta iyo Xaqiiqada Dhabta ah

Haddii la qaato nidaamka dugsiyada sare ee maadooyinka kala duwan leh (subject-based teaching), halkaas oo ardaydu bartaan ugu yaraan lix maado (Xisaab, Saynis, Af-Soomaali, Ingiriis, Diin, iyo Bulshada), waxaa loo baahanayaa in la buuxiyo 356 boos macallinimo. Haddii macallin kasta uu hal maado u dhigo afar fasal, markaas tirada dhabta ah ee macallimiinta loo baahan yahay waxay gaareysaa ku dhowaad 356 macallin.

Haddaba, su'aashu waxay tahay: xagee laga helayaa intaas oo macallin?

Xaddiga Macallimiinta Ka Qalin-jabiya Jaamacadaha Puntland

Xogta la hayo waxay muujinaysaa in jaamacadaha Puntland ay sanad walba ka qalin-jabiyaan ugu badnaan 40 macallin oo heerka sare wax ka dhigi kara. Tani waa tiro aad uga yar baahida jirta, taasoo muujinaysa farqi weyn oo u dhaxeeya baahida dhabta ah iyo wax-soo-saarka hay'adaha waxbarashada sare.

Waxaa xusid mudan in macallimiinta hadda ka shaqeeya dugsiyada sare aysan badankood helin tababar heer sare ah ama aqoon u gaar ah waxbaridda heerka sare. Sidoo kale, heerka ardayga-macallinka tababaran (Qualified Pupil-Teacher Ratio, QPTR) ee Soomaaliya ayaa lagu qiyaasaa in hal macallin uu wax baro 91 arday — heer sare ah marka la barbar dhigo heerarka caalamka.

Soo Jeedinno iyo Talooyin

Si looga gudbo caqabaddan, waxaa lagama maarmaan ah in laga jawaabo su'aalaha muhiimka ah: Ma ogyahay Wasaaradda Waxbarashadu baahidan? Ma jiraan qorshe cad oo lagu daboolayo? Jawaabtaas waxay u baahan tahay iskaashi dhab ah oo u dhaxeeya dhammaan daneeyayaasha waxbarashada.

Waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo:

1. Tababaro Degdeg ah oo lagu tayaynayo macallimiinta hadda shaqeeya.
2. Qorshe sannadle ah oo lagu kordhinayo tirada iyo tayada macallimiinta dugsiyada sare.
3. La-jaangoyn jaamacadeed si kor loogu qaado Kulliyadaha Waxbarashada.

Gunaanad

Puntland waxay wajahaysaa xaalad degdeg ah oo la xiriirta baahida macallimiinta dugsiyada sare. Haddii aan si degdeg ah wax looga qaban, waxaa la filan karaa in tayada waxbarashada ay si daran hoos ugu dhacdo, taasoo si toos ah u saameyn doonta jilka cusub. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in dhammaan hay'adaha waxbarashada, jaamacadaha, hay'adaha

horumarinta, iyo bulshada rayidka ah ay si wadajir ah uga shaqeeyaan sida xal waara loogu heli lahaa baahidan isa-soo taraysa.

Waxbarashadu waa tiirka bulshada — haddii macallinku tabar la' yahay, mustaqbalku wuu libdhi doonaa.

Dhammaad

June, 2025

Tixraacyo

- Puntland Ministry of Education and Higher Education. (2023). Education Sector Analysis Report 2024–2025. Garowe, Somalia.
- Puntland Education Development Centre. (2022). Annual Teacher Education Capacity Report. Garowe.
- UNESCO Institute for Statistics. (2022). Somalia Education Fact Sheet.
- Federal Government of Somalia & UNICEF. (2022). Education Statistical Yearbook – Somalia 2021/2022.
- Global Partnership for Education. (2021). Strategic Plan for Teacher Professional Development in Fragile States.

Qore: Said Ahmed Ali Maah

Email: saidtajir707@gmail.com

Institution: East Africa University Bosaso Puntland Somalia

Cinwaanada Xarunta HADAF

Badhan, Sanaag: Tel/WhatsApp: 00252907000020, 0905039933,
E:mail: hadafcetersom@gmail.com , website: www.hadafcenter.org